



Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, Tiếng Việt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Abril 13, 2022

Ku socota: Waalidiinta iyo Mas'uuliyiinta carruurta yar yar ee qabta I/DD, CME-yada iyo Daryeel bixiyayaasha (**CME-yada fadlan farriintan la wadaaga waalidiinta/mas'uuliyiinta carruurta yar yar.**)

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)

Ujeedada: Oggolaanshaha ku meel gaarka ahaa ee loogu talagalay waalidiinta ah daryeel bixiyayaasha lacagta qaata ahaan oo muddadiisa loo kordhiyay

ODDS waxay dhowr qoys ka maqashay sida uu waxtarka u lahaa oggolaanshaha Xaalada Caafimaad ee Degdega ah (PHE) ee u oggolaanayay waalidinta iyo mas'uuliyiinta carruurta yar yar ee qabta (I/DD) in ay noqdaan daryeel bixiyaha lacagta qaata ee ilmahooda inta lagu jiro cudurka baahsan ee COVID-19.

Mid ka mid ah waxyaabaha wanaagsan ee nidaamka naafanimada korriinka ee Oregon waa in uu inta badan jiro heshiis baahsan oo lagu yahay arrimaha muhiimka ah oo aasaaska u ah nidaamkeena. Waxaanu maqalnay aragtiyo kala duwan oo ku saabsan haddii ay tahay in waalidiintu sii wadaan in lacag lagu siiyo daryeelkooda carruurtooda wixii ka baxsan cudurka baahsan. Way iska caddahay in heshiis baahsani uusan jirin.

### **PHE oo muddadiisii la kordhiyay**

ODDS ayaa hadda uun heshay warkaasi Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid (**CMS**) waxay kordhinayaan muddada PHE-da hadda jirta — ee la qorsheeyay in ay joogsato Sabtida, **Abril 16, 2022** — ilaa 90 maalmood ilaa **Julaay 15, 2022**.

Ka dib marka ay joogsato kordhinta muddada, oggolaanshaha ku meel gaarka ah ee u oggolaanaya waalidinta in ay u shaqeeyaan daryeel bixiyayaal lacag qaata ahaan oo loogu talagalay carruurtooda wuu joogsan doonaa.

Waxaa muhiim u ah qoysaska isticmaalaya kala doorashada PHE ay ogaadaan in **uusan jiri doonin go'aan la xiriira su'aashani oo ku saabsan isbeddelada siyaasada ee joogtada ah ka hor inta aysan joogsanin PHE-da federaalku.**

### Tallaabooyinka xiga

**Waxaanu ku dhiirigelinaynaa waalidiinta iyo mas'uuliyiinta u shaqeynayay daryeel bixiyayaasha lacagta qaata ahaan in ay ula shaqeeyaan isku duwayaashooda adeegyada si ay ugu diyaar garoobaan in ay dib ugu noqdaan adeegsiga PSW-yada iyo DSP-yada kale.**

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).